

Xitaa haddii lagugu leeyahay kiro, misa lumiso foojarkaaga, ama jebiso heshiiskaaga, mulkiilahaagu **ma awoodo inuu:**



Beddelo qofullada
si aad uga baxdo



Kaa xiro alaabtaada
(nalalka, biyaha,
gaaska)



Walxahaaga dhigo waddada
ka hor inta uusan shariifku
imaan

Haddii ay tani kugu dhacdo, wac Xuquuqda La-talinta Ka saarida.

Waa maxay Foojarka Qaybta 8?

- Foojarka Qaybta 8 waa "**kabka guriyeynta**" kaas oo ku xidhan qof (foojar qaate ah) halkii guri dabaq ah. Haddii aad guurto, waxaad qaadan kartaa foojarkaaga.
- Haddii aad haysato foojar, waxaad ku bixin doontaa qiyaastii **30% dakhliga qoyskaaga bishii kirada**. Dawladdu waxay buuxini doontaa faraqa waxayna siin doontaa inta ka hartay kirada mulkiilahaaga bil kasta.
- Mararka qaarkood, dhismayaashu waxay yeelan doonaan wax la yiraahdo "**Qaybta 8-aad ee mashruuca ku salaysan**." Kani waa kabitaan guri oo kala duwan oo ku xidhan dhismaha qof beddelkii. Haddii aad **ka guurto** dhismaha Qaybta 8 ee mashruuca ku salaysan, **kabidu kuma so raaci doonto**.
- Qof kasta oo foojarka qeybta 8aad haysta waxa uu leeyahay **shaqaale kiis**. Hubi inaad taqaan kaaga!

Waa maxay masuuliyada iga saaran foojarka Qaybta 8?



- **60 maalmood gudahood ku hel unug**. Mulkiilayaashu maaha inay aqbalaan Qaybta 8. Wakhti dheeraad ah, ku codso kordhinta **ka hor** intaanay foojarku dhicin!
- **Dib u xaqiiji sanad kasta iyo mar kasta oo tirada qoyskaaga ama dakhligaagu is beddelo**. Sii caddaynta dakhliga qoyskaaga shaqaalaha kiiskaaga ee Qaybta 8.
- **Bixi qaybtaada kirada bil kasta**. U sheeg shaqaalaha kiiskaaga haddii dakhligaagu isbeddelo - waxay saamayn kartaa kiradaada! Saxiix ogolaanshaha loo baahan yahay iyo foomamka xaqiijinta.
- **Ha jabin heshiiskaaga**, ha ka dhigin meesha mid aan caafimaad qabin/ammaan ahayn, ama ha u hanjabin/ samayn wax khatar ah. **Tan waxaa ku jira martidaada**.
- **Qoraal** ku ogeysii mulkiilahaaga iyo shaqaalaha kiiskaaga dayactirka loo baahan yahay.

SOMALI -- SECTION 8

Goorma ayay Qaybta 8 isku dayi kartaa **inay joojiso** foojarkayga?



Waxaad kaliya ku waayi kartaa foorjarkaaga **SABAB** (sababa gaar ah dartood).

Tusaale ahaan, waxaad halis ugu jiri kartaa inaad weydo foorjarkaaga haddii;

- **Xadgudubto Barnaamijka.** Tani waxay la macno noqon kartaa in guriga laga saaro, ku guul daraystay in la soo sheego dakhliga ama dadka qoyskaaga, waxyeelo u geysato unuga, ama hanjabaad/samaynta wax khatar ah ama sharci darro ah.
- **Fashilka Kormeerida.** Haddii mulkiiluhu uu ku guuldareysto inuu dayactiro wakhtiga loo dejiyay Qaybta 8, waa inaad ku wareejisaa foorjarkaaga qayb cusub. Haddii aadan helin meel aad u guurto 60 maalmood **gudahood**, waxaad waayi kartaa foorjarkaaga. Waydiiso kordhin qoraal ah ka hor intaanay foorjarku dhicin haddi aanad meel heli karin.
- **Maqnaanshaha Dheeraadka ah.** Haddii aad gurigaaga ka maqnaanayso in ka badan 14 maalmood, qoraal ugu sheeg mulkiilahaaga iyo shaqaalahaaga qaybta 8. U caddee **inaadan** ka tagayn unuggaaga oo u sheeg sababta iyo muddada aad u malaynayso inaad maqnaato.

Maxaa dhacaya haddii foojarkayga **la** **joojiyo?**

Waxaad xaq u leedahay inaad dhegaysi la yeelato Qaybta 8 ka hor inta aanay joojin kaalmadaada. Weydiiso **kulan "cabashada" 10** maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda warqadda ku qoran.

- Kulankaaga cabashadaada la imaaw wixii **caddayn** ama **macluumaad** ku saabsan dhibaataada.
- Kulankaaga ugu horreeya wuxuu noqon doonaa kulan aan **rasmi ahayn**. Haddii aad dhibaataada halkaas ku xallin kari weydo, waxaad sida caadiga ah codsan kartaa dhegeysi **rasmi** ah.
- Haddii aad lumiso Qaybta 8, waxaad masuul ka noqon doontaa **100%** kirada. Haddii aadan awoodin inaad bixiso kirada, mulkiiluhu wuxuu isku dayi karaa inuu **kaa saaro** guriga.
- Xataa haddii aad kiradaada dib uga dhacdo, mulkiilahaagu kama beddeli karo qufulkaaga ama **kuma eryi karo**. Marka hore waa inay ku keenaan maxkamada.

Haddii aad hesho waraaqo maxkamadeed, aad **MAXKAMADDA!** Haddii aadan samayn, si toos ah ayaad u lumin doontaa.

Goorma ayaan guuri karaa anigoon lumin foorjarkayga?

Waxaad la guuri kartaa foorjarkaaga haddii aad siiso ogeysiis **qoraal** ah Mulkiilahaaga iyo qolyahaaga qaybta 8 ka dib **marka** heshiiskaagu dhamaado.



Haddii aad qoraal ahaan ugu sheegtay mulkiilaha gurigaaga iyo shaqaalaha kiiskaaga wixii ku saabsan dayactirka aad u baahan tahay laakiin mulkiilahaagu weli dayactirin, Qaybta 8 waa inay soo xigto iyaga. Haddii mulkiiluhu aanu weli wax hagaajin ka dib, waxa awood u yeelanaysa inaad ku guurto foorjarkaaga..

SOMALI -- SECTION 8